

# Maalgalin u soo socota basaska dugsiga oo cusub

Sibtambar 08, 2023 [Weydiimaha saxaafada](#)

Hindise cusub ayaa u oggolaan doona guddiyada dugsiyada inay gataan basas cusub oo ay ballaariyaan adeegyada gaadiidka si arday dheeraad ah oo reer Alberta ah adeegga u helaan.

Si loo horumariyo nidaamka gaadiidka ardayda, ilaa \$20 milyan oo maalgalin mustaqbalka ah ayaa hadda u diyaar ah guddiyada dugsiyada ee maamula basaska ardaydooda qaada. Waxa la filayaa maalgalintu inay suurtagaliso in la soo gato ilaa 115 bas oo cusub.

“Dawladda muxaafidka ah ee Alberta waxay qaadysaa tallaabooyin wax ku ool ah si ay uga caawiso in arday badan helaan gaadiid. Marka maalgalintan la bixiyo, kooxo dugsiyo ah oo dhawr ah ayaa awoodi doona inay iibsadaan basas dheeraad ah dhawaan kuwaasoo ka caawin doonaa in carruur badan dugsiyada aadaan. Tani waxay kordhin doontaa tirada ardayda ee raaca basaska dugsiyada, waxay yarayn wakhtiga basaska ay fuushan yihii waxayna qoysaska Alberta u tashiili lacag.”

*Demetrios Nicolaides, Wasiirka Waxbarashada*

Barnaamijka maalgalinta hore loo sii qaddimayo ee basaska dugsiyada waxay qayb ka tahay tallaabooyin ka waawayn ee dawladda Alberta ay ku hawlan tahay si ay u horumariso nidaamka gaadiidka ardayda. Miisaaniyadda 2023 waxay kordhisay maalgalinta gaadiidka ardayda \$414 milyan saddexda sano ee soo socda si loo gaaro horumarrada nidaamka ee la rabo.

Hindisahan halka sano ah waxa loo diyaariyey sidii barnaamij la dedejiyey oo kale, kaasi oo hordhac u ah maalgalinta goboleed ee sanadada mustaqbalka, si markaa loo isticmaali karo hadda marka loo baahdo. Cidda helaysaa waxay arki doontaa lacagta la sii qaddimay

oo ka muuqata qoondooyinka maalgalinta ee mustaqbalka, oo loo qaybiyey muddo ka badan 10 sano.

Kororka ku dhaca maalgalintu waxay u oggolaan doontaa guddiyada dugsiyada inay soo kordhiyaan dariiq baseedyo dheeraad ah si gacan looga gaysto inay kordhaan ardayda raacdaa iyadoo sababtuna tahay isbaddalo ku dhacay shuruudaha mutaysiga gaadiidka oo dhaqangali doonaa Sibtambar 1, 2024. Isbaddaladani waxay ka dhignaan doonaan 80,000 oo arday oo dheeraad ah inay mutaysan doonaan adeegyada gaadiidka dugsiga. 47,000 oo ardaydan ka mid ah kuwaasi oo hadda bixiya kharashka gaadiidka ayaa mutaysan doona in gobolku ka bixiyo, taasi oo waalidiinta iyo qoysaska u tashiili doonta lacag ka badan \$20 miliyan.

Guddiyada dugsiyada ee danaynaya helitaanka maalgalinta waa inay codsiyadooda u soo gudbiyaan sida ugu dhakhsaha badan marka ay xaqiijiyaan qorshayaashhooda soo gadashada basaska. Codsiyada waaxda ayaa ka hawlgali isla marka ay soo gaaraan. Wakhtiga kama dambaysta ah ee codsiyadu waa Oktoobar 31.

## Xaqiiqooyinka kooban

- Basaska dugsiyada ee cusub waxa la filayaa in kharashkoodu noqdo qiyaastii \$170,000 midkiiba.
- Afar iyo labaatan ka mid ah 63 guddi dugsi (38 boqolkiiba) ayaa si qayb ahaan ah ama si buuxda gacanta ugu haya basaskooda dugsiga waxaana dhici karta inay mutaysteen maalgalinta loosii qaddimayo si ay u gataan basas dugsi.

## Wararka la xiriira

- [Gaadiidka dugsiga oo ah mid ammaan ah qiiimiisuna jaban yahay](#) (Maarso 14, 2023)